

## **Clostridium difficilen maadada loo yaqaan marka saxarada laga baarayo**

### **Clostridium difficilen osoitusnäyte ulosteesta**

Waxaad ku talo-gashaa, in aad saamiga saxarada keento labaratoriga isla maalinta aad qaado ama ugu dambayn maalinta ku xigta subaxeeda.

#### **Qalabka loo baahan yahay in saamiga lagu qaado**

Waxaa lagu siiyey qalabkii aad ku qaadi lahayd saxarada oo ah baakad yar oo godan ama shay kale oo u dhigmi kara (sida; saxamda waraaqda ah ee halka mar la isticmaalo), saamiga saxarada dhaladii dhuubnayd oo lagu ridayey, bac lagu rido oo lagu soo xiro iyo warqaddii magaca lagu qorayey.

#### **Sida saamiga saxarada loo qaado**

Marka hore ku saxarood baakada godan ee kartoona ka samaysan ama saxan wan taaymmuyuus ah oo warqad ka samaysan.

Ku rid saxarada dhalada dhuuban oo gaarsii ilaa iyo 1/2 dhalada kala barkeeda. Dhalada dhuuban si fiican oo taxadar leh u xir.

Ku qor warqadda yar magacaaga, iyo lanbarkaaga aqoonsiga iyo saacadda iyo tariikhda aad qaaday. Warqadda yar ku dhaji dhaladda dhuuban ee aad saxarada ku riday. Dhalada dhuuban ee aad saxarada ku riday gali bacda. Ka dib bacda si fiican oo taxadar leh u xir.

Haddii aad isla maalinta aad qaaday saxarada keeni kari weydo labarotariga oo ka soo gaarsiin weydo, waxaad guriga ka dhigtaa saamiga meel fiican oo kulaylkeedu yahay kan caadiga ah ee guriga, 24-saac gudahood waa in aad ku keento ka badan lama ogolo.

Haddii aad qabto wax su'aal ah waxaad soo wici kartaa oo weydiin kartaa lambarka adeegga HUSLAB oo ah 09 471 86800 isniinta - jimcaha saacadda 7.30-15.30. OGEYSIIS: Jawaabta shaybarka taleefanka kuma sheegno.